



Wargelin muhiim ah oo ku saabsan dalbashada arjiga qaxootiga ee dadka magangelyo doonka ah

SOMALI

Waraaqahaa baa loo baahan ahay arjiga qaxootiga marka la dalbanaayo?

Dalbashada arjiga qaxootinimo waa ballantaada ugu horaysa ee aad la leedahay hay'ada qaxootiga iyo socdaalka. Waxaynu ku weydiin doonaa macluumaaadka khaas ee shakhsigaaga sida degmada aad ku noolayd waxbarashada iskuulka iyo tan xirfada, garashada luqadaha iyo wadada aad soo martay safarkaaga. Turjumaan ama turjumaanad baa fasiraya waxkasto aad sheegtid.

Si arjigaaga qaxooti deg-deg looga shaqeeyo fadlan inoo keen dukumeentiyada iyo waraaqaha hoos ku xusan, **intii aad heli kartid**, iyagoo warqad ahaan u samaysan:

Waraaqaha shakhsiga – fadlan waraaqo orjinaal kaliya

- Baasaboor
- Warqada aqoonsiga shakhsiga
- Aqoonsiga ardaynimada
- Warqada dhalashada
- Warqada laysanka gaariga
- Warqada diiwaangelinta qoyska
- Buuga qoyska
- Warqada guurka/nikaaxa
- Warqada tababarka ciidamada
- Warqada aqooniga adeega
- Warqada ka mid ahaanshaha koox
- Arbeitsnachweis
- Shahaadooyin (Shahaadada waxaa laga sayn koobi kaliya, Warqada Orijiinaalka waa laguu soo celin arjiga qaxootiga ka dib)

Asbaabo cadaynaya soo qaxaaga

- Sawiro
- Xukumo ama go'aano maxkamadeed
- Amar xarig
- Qoraal dacwadeed oo ku saabsan baaritaan boolis ama waraaqo kale oo booliska ka socda
- Waraaqo hanjabaad
- Maqaal wargeys (oo magacaagu ku qoran yahay)
- Warqada wanqalka
- Boosto ka timid baraha bulshada (Facebook, Instagram, Twitter i.w.m.) oo ka faaloonaya asbaabaha qaxitaankaaga
- Waraaqo kale, sida tusaale ahaan waraaqo markhaati

Cadayn qoraal

- Cadaynta dhakhtarka
- Warqada dhakhtarka
- Qiimeeyn cilmi-nafsi
- Cadayn ku saansan ulakac/jirdil
- Cadaymo kale

Ogoow: Soo qaado kaliya waraaqo adiga ku quseeya kaliya. Waraaqaha iyaga oo **daabacan** waa inaad soo qaadaa. Hadii ay waraaqaha ay kuwa diijital ah (tusaale ahaan hadii ay kom-buutarka ku jiraan) weydii meesha aad degen tahay in lagaaga daabici karo.

Cadaymaha shahaadooyinka dhakhtarka waxay noqon karaa kuwo aad ka keentay wadankaga, wadan kale ama Jarmalka. Hadii aad u baahan tahay la xiriir dhakhtar.

Fadlan inoo soo sheeg ciwaankaaga, hadii aadan degenayn xerada qaxootiga oo aad meel kale degen tahay.

Markii aad arjiga qaxootiga dalbato, waxaa lagu siinayaa ciqaamad aad dalka ku joogto inta go'aan laga gaarayo arjigaaga. Ciqaamada waa inaad markasto sidataa.